

Kuleejka loogu talagalay Arday kasta oo ka tirsan Seattle Public School

WAXBARASHADA BILAASHKA AH AYAA BILAW AH

Seattle Promise waxay u keentaa waxbarashada kuleejka arday kasta oo ka tirsan dugsiga sare ee Seattle public high meel uu gaari karo. Ardayda loo aqbalo barnaamijka waxay helayaan taageero shakhsi ah oo ay uga gudbaan dugsiga sare oo ay ku guuleystaan kuleejka iyo ilaa laba sano (ama 90 dhibcood oo kuleej ah ama shahaadada koowaad, hadba kii soo horeeya) ee waxbarashada bilaashka ah ee North Seattle College, Seattle Central College, ama South Seattle College.

Dhammaan ardayda dugsiga sare ee Seattle Public ee ku jira fasalka qalin-jabinta 2023 waxay u qalmaan, iyadoon loo eegayn celceliska buundada fasalka (GPA), dakhliga, kartida, ama waddanka dhalashada. Ardaydu waxay waxbarashadooda ka bilaabi doonaan Kuleejyada Seattle dayrta 2023.

TAAGEERADA AAD U BAAHAN TAHAY IN AAD KULEEJKA KU GUULAYSATO

Diirada saar waxbarashadaada adigoo lahayn culeys dhaqaale ee waxbarashada. Inta lagu jiro sanadkaaga ugu dambeeya ee dugsiga sare, waxaanu kaa caawin doonaa inaad dhamaystirto codsiyada kuleejka iyo kaalmada maaliyadeed, dooro fasaladaada ugu horeeya, oo aad u diyaargarowdo guusha kuleejka.

SEATTLE PROMISE WAXAA KAMID AH

WAXBARASHO BILAASH AH: Laba sano (ama ilaa 90 buundooyinka kuleejka ama shahaadadaada koowaad, hadba kii soo horeeya) ee waxbarashada bilaashka ah ee kuleejyada Seattle si aad ugu sii wadato shahaadada koowaad ee barnaamijka tababarka shaqada ama shahaadada koowaad ee beddelka si aad ugu sii waddo shahaadada koowaad ee afarta sano ah.

DIYAARGARAWGA KULEEJKA: Taageerada u diyaargarawga nolosha jaamacada, caawinta doorashada iyo diiwaangelinta xiisadaha, hordhaca macalimiinta kuleejka, iyo wax badan oo kaa caawinaya inaad u diyaargarowdo kuleejka.

TAAGEERADA SANADKA OO DHAN AH: Ka warhayn joogto ah oo lala sameeyo kooxda Seattle Promise si ay kaaga caawiyaan inaad u gudubto khibradaada kuleejka bilow ilaa dhamaad.

QORSHAHA MUDADA DHEER: La-talinta si aad gacan uga geysato qorsheynta tillaabooyinkaaga xiga, oo ay ku jiraan fursadaha helitaanka layliyo xagaaga iyo khibrad shaqo.

TAAGEERADA MAALIYADEED EE KA DAMBAYSA WAXBARASHADA: Kalmada dugsiga ee la xidhiidha waxyaabaha qaaliga ah sida buugaagta, daryeelka ilmaha, cuntada, guriyaynta, iyo gaadiidka kuwa u qalma.





SEATTLE PROMISE

seattlecolleges.edu/promise

Noqo Aqoonyahan Seattle Promise




CODSO

Khibradaada Seattle Promise aya kugu hagi kara tillaabooyinka hoose:

- Soo gudbi Codsiga Seattle Promise →
Ku eeg: Febraayo 17 2023
- U gudbi codsiga diwaangelinta kuleejka North Seattle College, Seattle Central College, ama South Seattle College →
Ku eeg: Febraayo 17 2023
- Soo gudbi waraaqaha kaalmada dhaqaale
 - FAFSA (Codsiga bilaashka ah ee Kaalmada Ardayga ee Federalka) ama codsiga WASFA (Codsiga Washington ee Kaalmada Dhaqaale ee Gobolka)
Ku eeg: Abriil 30 2023
 - Kaalmada dhaqaale ee kuleejka
Ku eeg: Agoosto 1 2023



seattlecolleges.edu/promise/apply





<https://apply.ctc.edu/user>



DIYAARI

Kadib markaad dhamaystirto dhamaan shuruudaha codsiga, waxaad ka qaybqaadan doontaa laba madal si aad isugu diyaariso guusha kuleejka.

 **Readiness Academy:** madal hal maalin ah ee May/June si laguugu baro saaxiibadaada Seattle Promise oo aad u hesho caawimaad doorashada iyo diiwaangelinta xiisadaha.

 **Summer Bridge:** madal hal maalin ah oo la qabto Sebteembar 12, 13 iyo 18, 2023 si ay kaaga caawiso inaad wax ka barato nololsha jaamacada oo lagu baro macalimiinta, shaqaalaha, iyo agabka kuleejka.



BILAW

Aqoonyahan Seattle Promise ahaan, waxaad la shaqayn doontaa khabiirkaaga Seattle Promise si aad isu diwaangeliso fasallada waana inaad iska diiwaan gelisaa ugu yaraan 12 dhibcood saddexdii bilood. Waxaa kale oo aad la kulmi doontaa khabiirkaaga ku-haynta saddex bil kasta si aad dib ugu eegto horumarkaaga oo aad u nadiifiso yoolalkaaga waxbarasho.

HALKAN ADIGA AYAAN KUU JOOGNAA



La xidhiidh khabiirka wacyigelinta ee lagu meeleeeyay dugsigaaga sare wixii su'aalo ah iyo caawinta habka codsiga. seattlecolleges.edu/promise/contact



SEATTLE COLLEGES
North • Central • South



Seattle Department of
Education & Early Learning

SEATTLE PUBLIC SCHOOLS



December 2022